Xawaalada Gunooyinka Elektoorinha Safmarka (EBT) (Pandemic EBT (Electronic Benefit Transfer)) (P-EBT): Barnaamijka Cuntada Dugsiga Xaalada Degdeg ah Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

1. **Waa maxay P-EBT, ama Safmarka EBT Barnaamijka Cuntada Dugsiga Xaalada Degdeg ah?**
   COVID-19 dartiis, caruurta u qalabka cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban waxay heli doonaan gunooyin dheeraad ah oo cuntada ah. P-EBT waxaa weeye gunooyin cusub oo ku meel gaadh ah oo markaa ka caawinaya qoysaska inay iibsadaan raashinka maadaama oo dugsiga la xidhay.

2. **Yaa qaadan kara P-EBT?**
   Qoys kasta oo haysta ilmo ku jira fasalka k-12 oo u qalma cunta bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga - oo ay ku jiraan caruurta dhigata dugsiyada cuntada bilaashka ay u tahay*dhamaan* ardada.

   P-EBT waxaa heli kara dhamaan ardayda iyada oo aan loo eegeynin xaaladooda dhalasho ama xaaladooda soo geleyti. Shardiga kaliya waa in ilmuhu uu u qalmo cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban.

3. **Hadii uu ilmuhu u qalmo, lacag intee le'eg ayuu heleyaa?**
   Waxay ku xidhan tahay tirada caruur ah ee gurigaaga qaadata cuntada dugsiga ee bilaashka ama qiimaha jaban. Xadiga ugu badan ee ilmo kastaa heli karaa waa $399. Waxa aad heli doontaa kaadh P-EBT oo dhamaan caruurta ah (tusaale ahaan: hadii aad leedahay 3 caruur ah, waxa aad heli doontaa kaadh $1,197 ay ku jirto).

   Qoysaska leh caruurta u qalanka cuntada bilaashka ah iyo qiimaha jaban **kadib** marka dugsiga la xidho **waxay heleyaan** wax ka yar $399 ilmo kastaa. Waxay ku xidhan tahay wakhtiga uu qoysku dalbaday cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ama Cuntada Aasaasiga ah. Gunooyinka P-EBT ($5.70 maalintii) waxay ku salaysan tahay tirada maalmaha waxbarasho ee dugsiga la xidhay:

   Maarso - $68.40
   Abriil - $125.40
   Maajo - $119.70
   Juun - $85.50

4. **Miyuu P-EBT saamaynayaa xaalada soo galaytiga ee qoyskayga?**
   Maya. Dalbashada ama isticmaalka P-EBT **ma** badalayso xaalada soo galaytiga waalidka ama ilmaha. P-EBT **maaha** dulsaarka shacabka. Cidna la waydiin maayo xaalada soo geleytiga ilmaha ama qoyska ama dhalashada marka ay dalbanayaan P-EBT.

5. **Sidee ayay caruurtaydu u heli karaan P-EBT?**
   Waxaa jira laba qaab oo loo heli karo P-EBT:

   Qoysaska qaata Cuntada Aas Aasiga ah (food stamps): Inta u dhaxaysa Juun 28keeda iyo Julaay 7 deeda, P-EBT gunooyinka ah waxaa lagu shubi doonaa kaadhka EBT ee aad hore u isticmaasho.

   Qoysaska haysta caruurta qaada cuntada dugsiga ee qiimaha jaban ama bilaashka ah: Waa inaad buuxisaa arjiga fudud kahor Agoosto 31 keeda ama bilawga sanad dugsiyeedka cusub (kolba ta danbeysa).

6. **Sidee ayaan u dalban karaa P-EBT?**
   Waxaa jira laba dariiqo oo loo dalbado:
   1. **Online ahaan:** www.WashingtonConnection.org (arjiga, doono sanduuqa 'Pandemic EBT - Emergency School Meals Program' ee qaybta kaalmada cuntada)



   2. **La hadal:** 877-501-2233 (Xarunta Xidhiidhka Adeega Macmiilka DSHS - turjubaada luuqada ayaa laga heli karaa)

   Si aad u dalbato, ilmo kastaa waa inuu yaqaanaa:
   - Macgaa dugsiga ama degmada dugsiga ilmaha:
   - Ilmahaagamagaciisa kowaad iyo sadexaad sida uu ugu qoran yahay duwaanka qoraalka dugsiga
   - Taariikhda dhalashada ilmahaaga

Gunooyinka P-EBT waxaa la ansixiyaa hadii macluumaadka ku yaala arjiga cuntada dugsiga ilmahaaga ay is yeeshaan macluumaadka ku yaala arjiga P-EBT ee ay hayso DSHS.
Waxa aad dooran kartaa meesha laguugu soo dirayo kaadhkaaga P-EBT adiga oo ku qoraya arjiga P-EBT. Hadii ilmahaaga (caruurtaada) loo ansixiyo, kaadhkaaga P-EBT waxa uu kuugu soo dhigi doonaa boosta 3-5 maalmood kadib marka la ansixiyo. Maadaama oo shaqada arjigu badan tahay, waxa ay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood oo shaqo in laga shaqeeyo arjigaaga.

7. **Goorma ayuu ku eeg yahay arjiga P-EBT dalabkiisu?**
   Waa inaad dalbataa Agoosto 31keeda, 2020, ama wixii ka horeeya bilawga sanad dugsiyeedka 2020-21 (kolba ta danbeysa).

8. **Sidee ayaan ku ogaanayaa in la ansixyay arjigayga?**
   Waxa aad heli doontaa kaadhka P-EBT oo laguugu soo diro boosta iyo macluumaadka sida loo isticmaalo kaadhkaaga P-EBT-ga. (Eeg #6 wixii macluumaad dheeraad ah sida loo dalbado). Nidaamka ansixintu waxa uu qaadan karaa mudo dheer hadii aad u qalanto cuntada dugsiga ee qiimaha jaban iyo bilaashka ah kadib markii la xidhay dugsiga.

   Hadii arjigaaga P-EBT la diido, waxa laguugu soo diri doonaa warqad boosta laguugu sharaxayo sababta ay taasi u dhacday iyo sida aad uga qaadan karto rafcaan hadii diidmadu khaldan tahay.

9. **Maxay tahay in aad sameeyo markakaadhkaP- EBT boosta kugu soo gaadho?**
   Waxa aad raacdaa tilmaamaha la socda kaadhka P-EBT. Waxa aad lasoo hadli kartaa oo aad bixin kartaa boosta arjiga P-EBT si aad uga shaqaysiiso kaadhkaaga P-EBT iyo inaad samaysato xisaab adiga oo isticmaalaya lambarka PIN-kaaga. Marka laga shaqaysiiyo kaadhkaaga P-EBT, waxaa loo isticmaali karaa inaad booshariga kaga iibsato cuntada, suuqa beeralayda, iyo online ahaan Amazon iyo Walmart ilaa hal sano oo ka bilaabma wakhtiga aad heshey kaadhka P- EBT.

10. **Sidee ayay wax noqonayaan hadii kaadhkaayaga P-EBT uu kusoo gaadho isaga oo lacag khaldan ay ku jirto.**
    Hadii aad u aragto in xadiga ku jiraa uu khaldan yahay waxa aad kala hadashaa Xarunta Xidhiidhka Adeega Macmiilka 877-501-2233.

11. **Miyay caruurtu weli ka qaadan karaan cuntada dugsiga iyo hay'ad kale hadii ay qaataan P-EBT?**
    Haa. Caruurtu waxay ka qaadan kartaa cuntada dugsiyada **iyaga oo sidoo kale** qaadanaya P-EBT. Waxaa weeye barnaamijyo kala duwan. Gunooyinka P-EBT ma badalaan cuntada dugsiga ama hay'adaha kale.

12. **Imisa jeer ayaan qaadan kartaa gunooyinkayga P-EBT?**
    Hal mar. P-EBT maaha guno bile ah, sida food stamps ama WIC.

13. **Sidee ayay noqonaysaa hadii aad online ahaan ku dalbado oo aanan helin kaadhkayga P-EBT ama ay isoo gaadho warqad diidmo arjigayga ahi?**
    Waxaad kala hadashaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (Department of Social and Health Services, DSHS) Xarunta Xidhiidhka Adeega Macmiilka 877-501-2233. Waxa aad heli kartaa inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Isniin ilaa Jimce (marka laga tago ciidaha).

14. **Maxaan ku iibsan karaa gunooyinka P-EBT?**
    Gunooyinkaaga P-EBT waxaad kaga iibsan kartaa cuntada badanaa tukaamada iyo suuqa beeralayda, ama waxaad kaga iibsan karaan booshariyada onlineka ah ee Amazon iyo Walmart.

    P-EBT looma isticmaali karo:

    - Khamrida
    - Wixii aan cunto ahayn (sida, agabka qoyska, alaabaadka suuliga)
    - Cuntada hore loo kariyay ee diiran
    - Fiitaamiiyo iyo dawooyin

    Waxa aad u isticmaashaa kaadhka EBT sida kaadhka kaydka bangiga oo kale:
    - Dooro "EBT"
    - Waxa aad marisaa kaadhka P-EBT
    - Waxa aad gelisaa lambarka PIN-ka gaarka ah

15. **Miyay tahay inaad mar kaliya wada isticmaalo gunooyinkayga P-EBT marka uu isoo gaadho kaadhku?**
    Maya. Waxa aad haysataa gunada P-EBT mudo hal sano ah marka uu kaadhku kusoo gaadho.

16. **Yay tahay inaan la hadlo hadii aad qabto su'aalo?**
    La hadal 877-501-2233 Xarunta Xidhiidhka Adeega Macmiilka DSHS)
    8 subaxnio - 5 galabnimo, Isniin ilaa Jimce (marka laga tago ciidaha)

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan xaalada soo geleytiga iyo gunada cuntada, waxa aad kala hadli kartaa looyar soo geleytiga ah. Hay'adahani waxay yaqaanaan sharciga P-EBT iyo soo geleytiga; waxa ay kaaga jawaabi karaan su'aalahaaga.

- NWIRP Seattle Office: 206-587-4009
- NWIRP Yakima Valley (Granger) Office: 509-854-2100
- NWIRP Wenatchee Office: 509-570-0054
- NWIRP Tacoma South office: 206-816-3893

17. **Maxay samayn karaan qoysaska dhakhligoodu hoose ee aan qaadan Cuntada Aas Aasiga ah ama cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban, si ay u qaataan gunooyinka P-EBT?**
Qoysaska leh caruurta da'da dugsiga ee dhamaan waayay shaqada ama dakhligoodii waxay buuxin karaan arjiga cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama qiimaha jaban ee degmada dugsiga **kahor Juun 30** keeda iyo kahor **inta** aynaad dalban P-EBT. Waxaad sidoo kale dalban kartaa Cuntada Aas Aasiga ah kahor Juun 30 keeda online ahaan(www.WashingtonConnection.org) ama adiga oo kala hadlaya (877-501-2233 – Xarunta Xidhiidhka Macmiilka DSHS). Hadii laguu ansixiyo Cuntada Aas Aasiga ah, waxa aad qaadan doontaa gunooyinka P-EBT ee caruurta gaadhay da'da dugsiga.

Hadii laguu ansixiyo Cuntada Aas Aasiga ah ama Cuntada Bilaashka ah iyo Qiimaha Jaban ee dugsiga kadib marka la xidho dugsiga iyo wixii ka horeeya Juun 30, 2020, gunooyinkaaga P-EBT waxaa lagu samayn doonaa qiimayn hore.

Bayaanka Bilaa Takoorka Waaxda Beeraha Maraykanka (United States Department of Agriculture, USDA)
Xaaladani waa fursad loo siman yahay.